SOOYAALKII NOLOLEED IYO SHAQO
EE
Marxuum Axmed Xasan Sh. Suufi
"Cawke"

Hordhac:

Dhamaan waxaan bulshada afka Soomaaliga ku hadasha, gaar ahaan bulshada reer Soomaaliland, sis ii gaar ahaaneedna ehelkii,qoyskii iyo caruurtii uu ka baxey ka tacsiyadeynaynaa Geerida naxdinta leh, ee kadiska ah eek u timid wariyaheenii qarnigan ugu caansanaa ee Axmed Xasan Sh. Suufi Cilmi "Cawke".

Bahda Mareegta Farshaxan oo qoraal ku saabsan taariikh nololeedkiisa iyo shaqadiisaba bishii Oktoober ee 2009 ayaa dibu habeyn qoraalkaa idiinku samaysay, bulshadana la wadaageysa….

Tusmada Qoraalka:

- **Hordhac**
- **Soyaalkii Awoowgii Suufi Cilmi iyo Saylac ..**
- **Sooyaalkii Xasan Suufi Cilmi**
- **Sooyaalkii Axmed Xasan Suufi Cilmi (Cawke)**
- **Geeridii Axmed Xasan Cawke**
- **Maxaa lagu xasuusan doonaa**
- **Qoraalo iyo Maansooyin Baroordiiq ah**
- **Gabagabo**

Mareegta Farshaxan
Fu,aad Sh.Abuubaker
Oktoober,2009

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Hordhac:

"*Runtii horta abuuri way iska jirtaa ,waxaadse jeceshahay aadna aaminsan tahay waad samaynaysaa….".*

Axmed Xasan Cawke

Xilli ku beegnayd 1989[kii], anigoo ku soo dhaw sarta Savoy Center ee ku taala magaalada Muqdisho ayaa wiil aanu saaxiib nahay kor dhawaaq iigu sheegay in gaadhiga hor yaala sarta uu la socday(watey) marxuum Axmed Xasan Cawke uuna dhinaca gudaha u dhaqaaqay.

Iswaydiintii halkuu galay iyo waxaa isku xigay annagoo ag taagan marxuum Axmed Xasan.Hase yeeshee muuqaalka ay indhaheygu arkayaan iyo mala-awaalkii maankayga dhex jibaaxayey ayaa isku kay qaban waayey oon nafta u sheegay malaha saaxiibkay Cawke kale ayuu sheegayaa.Afkiisa caano lagu qabay, marxuum Axmed Xasan Cawke ayaa Hadley oo waxay dhaguhu maqleen codkiisii. Arintiisii isbadashey oo si degdeg ah baanay dheguhu ugu markhaati fureen indhihii ku maqnaa si ay sawir meelmara uga kaydsadaan dhacdadan hore looma arkaanka ah.

Maqalka codka marxuum Axmed Xasan Cawke ee dhagaha soo gaadhaya iyo muuqaalkiisa markay indhuhu qabtaan waxaa in badan oo bulshada Soomaliyeed ka mid ah muran ka dhex dhaliya humaaga uu maanku kuu sawirayo markaad codkiisa maqlayso oo aad uga duwan markaad indhaha qac ku siiso.Sidani waxay ku dhacday dad badan, waanan garowsadey waxay dadku sheegayeen.Hase yeeshee taasi hawada ayey ka baxdey kol haddii farsamada casriga ahi iminka suurto galinayso in maqal iyo muuqaalba si fudud la iskugu heli karo.

Marxuum Axmed Xasan Sh.Suufi "Cawke" wauxuu ahaa weriye caan ah, madasha uu joogana si qiimo iyo qurux leh uga muuqda.Wuxuu dabayaaqadii horaantii bishii Juun ee 2009 diyaariyey

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

dood ugub ah oon hore loogu arag bulshada ku hadasha af-soomaaligu meeshay doonaanba ha degaanee.Marka laga hadlayo marxuum Axmed Xasan Cawke ahaan inuu hindise iyo hormayn cusub la yimaadaa kuma cusba dadka, bulshaduna waa uga baratey,ee u tartamayaal jagada ugu sareysa dal oo su'aalo isku mid ah dhexda loo dhigay ayaa tilmaanteeda soocan laheyd iyo siduu ugu dhiiradey arintaa ugubka aheyd. Waxaa runtii amaan leh saddexda tartame oo si hufan,horumar siyaasadeed iyo si caqli suubaniba ka muuqato uga qayb qaatey doodaa.Waxaaney kala ahaayeen mudane Daahir Riyaale Kaahin, mudane Axmed maxamed Siilaanyo iyo mudanae Faysal Cali Waraabe. Taasoo tilmaan fiican ka ah horumarka dhinaca siyaasada ee ay Somailand ku talaabsatey mudadii gaabneyd ee ay dhidibada u taageen dibudhiska dalka Soomaaliland.Waxaanna doodan lagala socday dhamaan mareegaha internet-ka,wargeysyada, cod-baahiyayaasha, iyo fogaal-aragyada kala duwan.

Waxaa mareegaha,cod-baahiyayaasha, iyo TV-yada(fogaal aragyada) ku baxa afka Soomaaligu ay dhamaan jeclaayeen inuu Axmed Xasan Cawke xubin ka mid ah shaqaalahooga noqdo Cawke, waxaanay dareemaan gudcur iyo in gabal u dumay markuu u digo rogto mid kale, iyadoo ta uu ka hawlgalayaana muujiso farxad iyo raynrayn ay jiilaalka kaga baxaan kol hadduu Cawke iyaga garab taagan yahay lana daadihinayo barnaamijyadii ay wadeen oo bulsha weynta Soomaaliyeed dhegaha u sii sifaysanayaan.

Imisaa dad joojiyey dhegaysiga ama daawashada warbaahin Cawke ka dhex baxey, imisaase ku laday bulshada uu codka Cawke soo jiitay kuna darey bahweyntooda?.

Warbixintaasi waxay inagu khasbaysaa inaynu u kuurgalno barashada shakhsigan Ilaahay hibada codkarnimo ugu deeqay.Nasiib wanaag bahda Mareegta Farshaxan ayaa u tafoxaydatey una banbaxdey inay raadraac ku samayso taariikh nololeedkii Axmed Xasan "Cawke", lana wadaagto bulshada ku hadasha af-soomaliga ee had iyo jeer u heelan inay waqti siiyaan ka gudashada xiisaha leh ee maqal iyo muuqaalba wariyahoogii soocnaa ee marxuum Axmed Xasan Cawke.

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Bahda Mareegta Farshaxan waxay arintan hore u fulisay si ay Cawke oo noolaa xilligii qoraalkani soo baxey ugu sheegto isagoo nool in ummada uu had iyo jeer ku dadaalo raaligelintooda iyaguna og yihiin dadaalkiisa una mahadnaqayaan, bulshada uu raaligeliyana bal si qoto dheer u bartaan sooyaalkii Axmed Xasan "Cawke".Sidoo kale ayey bahda mareegta Farshaxan iminka qoraalkii oo dibu habeyn lagu sameeyey bulshada ula wadaageysaa si ah xusuus iyo baroordiiq loo hibaynayo marxuum Axmed Xasan Cawke.

Geeridu waa lama huraanee,aadamaha aan ka soo jeedno ayaa dhaqan ka dhigtey inay qofku markay tii Illaahay soo qaabisho ku dadaalaan ka waramida wanaaga qofku galay waana sifo wanaagsan.Hase yeeshee waxaa ayaan daro ah intuu qofku noolyahay aan la dareensiin halkuu bulshada kaga jiro. Sidaa darteed ayaa Mareegta Farshaxan oo had iyo jeer lagu baadi-sooco u heelanaanta raadraaca taariikhda, dhaqanka, iyo hidaha bulsha weynta Soomaliyeed gaar ahaan ta Somaliland ayaa u hub qaadatey inay Axmed Xasan "Cawke" la wadaagto dareenka bulshada u heelan maqalka codkiisa kuna soo hirta goobta warbaahinta uu kolba ka hawlgalo,isagana ku dhiirigalinaysay markii uu noolaa inuu sii kordhiyo dadaalka iyo hawlkarnimada uu u leeyahay warbaahinta .

"Ha laguu ilmeeyee,
Horto dhimo af maahee,
Eeggoo la noolyiyo,
Ifkaan kaaga baahanahay,
Wax yar oo aqoonsiya,
Oon aad u buurnayn,
Oo weliba eegeey,
Igu sii amaahoo,
Ictiraafka buuxee,
Aakhiro markaan tago,
Iilka igu sugaayiyo,
Ayaantaan xabaal galo,
Oohintaan mutaystiyo,
Akowntkayga laga jaro,"

Maxamed Xaashi "Gaarriye"

La soco qaybaha danbe…….

Bahda Mareegaha Farshaxan
www.farshaxan.com iyo www.farshaxan.org

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Qaybtii Labaad
Bahda Mareegta Farshaxan
Nofember, 2015

Faaraxow galgaladkaan dhigiyo gama' la'aantayda
Gogoshaan ku jiifsaday hurdada goodkii igu yaacay
Gasiinkii la ii dhigay waxaan gawska uga daayey
Dar guryii ka yimi baa war baas iila soo galaye
Geeridii Xirsay sheegayeen gacal ha waayeene
Goblamooyin waxay ii wadeen guuldarriyo hooge
Gabbal baa u dumey reerihii geliga Booc yiille
Abidkii rag waa go'i jiree tanise waa gaw'e
Lix hal oo u wada gaar ahaa gocanayaa mooyi

Cali Jaamac Haabiil(IHUN)

Axmed wuxuu ahaa nin salaadda ku fiican; Axmed Cawke ayaa na tukin jiray intaanu ku jirnay safarkayagii aanu ku gaalabixinaynay degaanada Itoobiya; Axmed xasan wuxuu ku fiicnaa cibaaddada Ilaahay; Axmed Cawke wuxuu ahaa nin Illaahay u dhaw; Marka la eego hab-dhaqankiisa wuxuu lahaa sifihii lagu tilmaamey ehlu Jannada; Axmed Xasan Cawke wuxuu ahaa nin dhaqan wanaagsan,oon waligii lagu arag isagoo qof u cadhooday; Axmed Xasan aad ayuu qof kasta u ixtiraami jiray; Axmed cawke si siman ayuu dadka u wada ixtiraami jirin umanyna kala soocnayn yar, weyn, madaxweyne, rayid,iwm…..

Weedhahaa iyo kuwo la mid ahaa ayaa qoraal iyo odhaah ahaanba ay ku soo badhigeen dadkii ka waramayey sooyaalkii iyo hab-dhaqankii marxuum Axmed Xasan Sh. Suufi Cilmi.

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Maahmaah qalaad ayaa tidhaahda "Charity begins at home". Sidaa darteed ayeynu qoraalkan dib ugu jaleecaynaa reerka uu ka soo jeedo marxuum Axmed Xasan Cawke.

Dadku kala ayaan roon
Ama kala aqoon dheer
Ama kala asluub weyn
Maansada Amal, Maxamed Ibraahin Warsame(Hadraawi)

Waxaa Marxuum Axmed Xasan Cawke awoow u ahaa Sheekh Suufi Cilmi(IHUN). Dhalasho ahaan iyo korniinba wuxuu Sh.Suufi Cilmi ku qaatey degaanka Wajaale iyo Kalabaydh. Xilligaa Wajaale iyo Kalabeydhka midna muu laheyn tilmaamaha degaaneed ee lagu yaqaan iminka. Sh.Suufi Cilmi wuxuu nasiib u helay inuu noqdo ardey barta aqoonta diinta sida Quraanka, Xadiiska iwm.

Sh.Suufi Cilmi wuxuu ku biiray xerta si uu aqoon ugu yeesho diinta Islaamka ee uu aaminsan yahay. Muddo ka dib ayuu Sh.Suufi Cilmi u wareegay magaalada Saylac oo xilligaa aheyd hormoodka magaalo ganacsiyeedyada geeska Afrika, waxaa kale oo ay aheyd magaalo diimeed, iyo magaalo xeebeed isku keentay bulsho kala duwan. Si uu aqoon diimeed u sii korodhsadana waxay ka Saylac mid aheyd goobaha ugu mudan ee ka heli karo xilliga

Sidoo kale ayey bar kulmis u aheyd safarada kala duwan ee Afrika iyo Aasiya. Sh Suufi Cilmi muddo gaaban gudaheed ayuu ku noqday Sheekh ka mid ah sheekhyada Saylac laga danbeeyo. Aqoon ahaan iyo ku dhaqan diimeedba Illaahay waa ugu deeqay, isna dadaalkiisa muu yareysan. Waxaana Sh.Suufi Cilmi gacanta laga galiyey Taskiyadii.

Wuxuu Sh Suufi Cilmi dib ugu soo noqday degaanada Gabiley, Gogaysa, iyo agagaarka Kalabaydhka si uu wax u baro dadkii deganaa degaanadaa. Culimada Sh.Suufi Cilmi ka faa'iiday waxna ka baratey waxaa ka mid ahaa Sh. Muumin, Sh. Cismaan Sidci. Iwm.

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Aan ku yara hakano Saylac iyo ka sheekaynteeda in yar.Magaalada Saylac oo qoraalada qaar ku magacaabaan "Aualites" waxay leedahay taariikh aad u fog. 529 C.D. ayuu ka dhoofay boqorkii Xabashidu, markii uu u sii socday magaalada Cadan ee dalka Yaman. Magaalada Saylac waxaa soo booqday qoraagii caanka ahaa ee Ibn_batuutah 1330-kii, halkaasoo uu ku tilmaamay inay ahayd magaalo weyn xilligaa.

Mareegta Saaxil

Qarnigii 16aad waxay magaalada Saylac ahayd caasimaddii maamulkii caanka ahaa ee Awdal. Qoraalada laga hayo Saylac way farabadan yihiin,balse aan ku soo koobno socdaal uu ku soo maray nin la odhan jiray Richard Burton. Ninkani si uu safarkuna ugu fududaato , hawlihiisii basaasnimana u hirgalaan wuxuu la baxey Sheekh Cabdilaahi.

Xilligaasi waa sebenkii uu ka talinayay magaalada Saylac Xaaji Sharmaarke Ali Saalax oo magaalada ka ahaa guddoomiye muddo dheer. Wuxuu xilkaa uga danbeeyey Sayid Maxammed Al Barr oo u joogay khilaafadii Cusmaaniyada. Xaaji Sharmaarke waxna muu akhriyo jirin , manuuna qori jirin. Waxaase aad loogu yaqaaney lagagana danbeyn jiray inuu afar seefood gacan ku wada qaado, kuna dagaal gali jiray mar kaliya. Inkastuu xilliyadaa ku dhawaa lixdamadii, wxuuu lahaa jidh aad u dhisan, oo dusha laga huwiyey dhar qurux iyo bilicba leh. Wuxuu aad ugu hamiyi jiray in uu gacantiisa soo galiyo labada magaalo ee Herer(oo iminka ka

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

mid ah kilinka shanaad ee Itoobiya) iyo Berbera. Tani waxay awood dheeraad u siinaysay Xaaji Sharmaarke inuu xeebahana gacanta ku hayo, Itoobiyana lug ku yeesho.

Richard Burton(Sheekh Cabdilaahi) wuxuu ku tilmaamay magaalada Saylac inay ahayd magaalo weyn oo uu ka socday ganacsi aad u xoog badani.Ganacsigaasi kumuu eekayn xoolaha iyo badeecadaha oo la kala iibsado ee xataa waxa magaalada laga dhoofin jiray dad la soo khasbay,oo loo iib-gayn jiray Sayladaha carabta,dadkaasoo laga soo qab-qaban jiray badhtamaha Afrika. Richard Burton socdaalkani wuxuu ugu socday magaalada Herer,Saylacna marin uu sii maray ayey noqotay.Magaalada Saylac qiimahaa iyo ku ka badan ayey laheyd

Sh.Suufi Cilmi markuu diin faafintii muddo wadey, dad badanina ka aflaxeen ayuu ku noqday magaaladii Saylac.

Sh.Suufi Cilmi wuxuu guursadey laba jeer, Ilaahayna wuxuu ku galadey saddex wiil oo ugu kala wanqalay Jaamac (dadkuna ku naaneysi jireen Jaamac Feesto), Maxamed Xabiib , iyo Xasan oo danaankiladii degnayd magaalada Saylac ay magacaasi ugu ladheen Cawke. Sida halkaa ka cad magaca Cawke waa eray ka soo jeeda afka Danaakilada(Canfarta) ah tilmaan midabeed.

Muddo ka dib ayuu Sh.Suufi Cilmi (IHUN) ku geeriyooday magaalada Saylac, laguna aasay halkaa. Saddexdiisii wiil ayaa markaa bilaabey inay kala hayaamaan, Maxamed Xabiib

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Sh.Suufi Cilmi wuxuu u dhaqaaqey dhinac Lawyacade oo ka bilaabey ganacsiga ah inuu dadka safarka ah u kala socda Djibouti, Itoobiya iyo Somaliland Protecorate u sameeyey huteel. Barigaa Huteeladu umay dhisnayn, bilcsaneyna sida ay iminka yihiin. Sariiro cadiira oo dibada yaala iyo kaniifyo gooni gooni ah ayuu ka hirgaliyey magaalada Lawyacade. Sidoo kale ayuu u raaciyey goobtii wax laga cunayeyna. Wuxuu Maxamed Xabiib ku guuleystay inuu magaalada Lawyacade ka dhigo goob lagu nasan karo,la joogi karo, lagu ilaawi karo socdaalkii dheeraa ee la soo galay.

Jaamac Sh.Suufi Cilmi iyo Xasan Sh.Suufi Cilmi waxay u soo dhaqaaqeen dhinaca degaanada Wajaale iyo Kalabaydh. labaduba waxay noqdeen ganacsade.Inkastoo magaalada Wajaale koboceega, magaceega oo kor looqaado, iwm uu qayb laxaad leh ka qaatey Xasan Sh, Suufi (Xasan Cawke). Waxay magaaladi aheyd bar kulan uu gumaystihii Talyaaniga iyo Ingiriiskuba qayb ku lahaa. Hase yeeshee ganacsade Xasan Sh Suufi ayaa kaalin la tilmaami karo ka qaatey magaaleynta Wajaale. Magaciisa ayaa ku soo dhacaya maanka qof kasta oo tilmaan ka bixi is yidhaa Wajaale:

"Tog-Wajaalihii baan tagayaa, Taamudka ahaaye,
Toolmoonihii Muxumed ,ee aan tabayay ii yeedh,
Xasan iyo Tujaar wehelisaan, tagi agtoodiiye,
Jinkii Lacagta tuul tuuli jirey toosi Gegedii,
Tarba yow wakaa yidhi , isagoon cidi tilmaamayn.

Wajaale(Tog-Wajaale) waa bar kulanka Somaliland iyo Itoobiya una kala qaybsan laba qar,oo wadaagta magaca guud . Inkastoo dadka qaarkii ay ku sii tilmaansadaan qar Soomaali dhinaca Somaliland, halka ay qar xabashina ku tilmaamaan dhinaca Xabashida. Hase yeeshee magacda

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ay ku caano maashey ee xilligaa loo yaqaaney waxay ahaayeen Laanta Curdinka, Garoonka, Tuur Caanood iyo Wajaale (ama Tog-Wajaale) oo ay iminka ku suntan tahay.

Barigii hore waxay ku taaley degaanka Galbi Haadley , muddo ka dib ayaana loo soo rarey halka ay iminka ku taalo. Dakada Qalalan ayaana iminka loogu ladhaa magaceega Tog-Wajaale.

Xasan Sh.Suufi (IHUN) oo ah Axmed "Cawke" aabihii ayaa wuxuu isagu deganaa degmada Wajaale ee Gobolka Gabiley,waxaanu ka mid ahaa dadka ugu hantida badan degaankaa, inkastoo dadka qaarkii ku tilmaamaan Wajaale ahaan inuu hormood isagu ka ahaa.Wuxuu Xasan (IHUN) lahaa guryo badan,dhoofina jiray dibidda iyo hargaha. Halka ay Hargeysa hormoodkeeda ahaayeen Xasan Dalab, Xasan Rakuub,Xaaji Gaydh, Gabileyna Xaajiyada (Xaaji Askar Cabdilaahi iyo Xaaji Barkhad Qalinle). Dhamaantood Ilaahay ha u naxariisto.

Waxaa Xasan Cawke magaalada Berbera uga wakiil ahaa nin la odhan jiray Sayid . Xasan waxaa u dhexday marwo Caasha Nuur.Waxaana aabo Xasan Sh. Suufi iyo hooyo Caasha Nuur Ilaahay ugu deeqay wiil iyo gabadh,halka ay wiilka ugu wanqaleen Axmed,gabadhana Canab.

Waxaa tilmaan weyn aheyd magaalada Wajaale harta uu lahaa Xasan Sh.Suufi (IHUN) oo la odhan jiray Harta Xasan Cawke. Kaynta jiqda ah ee ka sokayso Kalabaydh ayaa iyaduna aheyd meel lagu booqdo ama siyaarto Sh.Suufi Cilmi (IHUN).

La soco qaybaha danbe ……..

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Qaybtii 3aad
Bahda Mareegta Farshaxan
Diisamber, 2015

Ruux kastuu kaftan-wadaag la lahaa, lana jaanqaadi jiray:

Duufaan xasuusuhu kacsheen daali madaxayga
Dubaaqayga qiirada damaqday igu dinnaahyeeye
Ilmo dabarku hayn waayey oo dhaba u dareeraysa
Hadba duugay waan duugayaa dooxse lama mooso!
Geeridu dibnaha waa mid qudha dihasho yeedhmeede
Kala daranse waa kala dareen dugayda dhiileede
Axmed xasanna tii naga dishaay dubatay jiidhkayga
Dar ilaahay waan kaa naxee dirac miyaad qaaday
Dadkii baad ka wada oohisee danab miyaad aastay
Dayaxaad madoobaysayeed damisay nuurkiisa
Dib miyaan indhaha loo tusayn diirshe ina cawke?

Dareen Abwaan, Abwaan Xasan Daahir Weedhsame

"Magaca Hiba – Nuura – waxaa ii bixiyay Cawke, wuxuuna ahaa shaqsi igu weyn, wuxuu ahaa nin cid kasta la kaftama." Ayey fanaanada Hibo Maxamed ka sheegtay goob loogu baroor-diiqayey marxuum Axmed Xasan Cawke…. Sidoo kale ayaa kornayl Maxamed Xasan Jidhif oo ka waramayey taarikhda marxuum Axmed Xasan Cawke yidhi: " Wuxuu ahaa nin dad la socod leh, Wuxu ahaa ilaa caruurnimadiisii ilaa iyo maanta xiligaa uu soo gaadhay nin dabeecad wanaagsan,dulqaad badan,deeqsiya,oo aanay farxadi ka dhamaan, oo aanan xasuusan karin maalina isaga oo cadhoonaya, runtiina ma aheyn shakhsiyad leh wax cadaawad ah, oo waxaad ka garataa jacaylka ay u qabeen dadka afka soomaaliga ku hadlaa guud ahaan".Waxaa kale oo kornayl Maxamed intaa raaciyey inuu naaneysta uu ku caano maalo ee "Jidhif" uu u bixiyey

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

marxuum Axmed Xasan Cawke. Waxaa tacsidiisa aan ka hadhin fanaanka Xasan Aadan Samater oo ku daray in magaca Xasan Bashe uu u bixiyey Axmed Xasan Cawke….Magac uu cid u bixiyo, kaftan uu la yeesho qof, xidhiidh shaqo ama saaxiibtinimo oo lala yeesho,si kastaba ha haatee qofka xidhiidh noocuu doono ha haadee Axmed Cawke dhex maraa wuxuu qalbiga qofkaasi ku reebayey kalgaceyl raaga iyo jaceyl dheeraad ah.

Socdaal gaar ahaaneed oon ujeedo kale laheyn ayey Mary Harper u soo gashey booqashada xabaasha marxuum Axmed Xasan Cawke. Mary Harper waxay ka tirsan tahay shaqaalaha BBCda.Waxay Mary Harper ka soo bilawday socdaalkeeda magaalada London, sii martay Addis-Ababa, ku soo nasatey Jigjigga si ay u xusto soo dhaweyntii qiimaha laheyd ee uu u fidiyey Axmed Xasan Cawke bari hore oo ay timid Jigjiga. Socdaalkeedii ayey bartii u qoondaysnayda u sii hogaamisay, waa Xabaashii marxuum Axmed Xasan Cawke. Waa dhacdo muujinaysa siduu Axmed Xasan Cawke u degay qalbiga qof lkasta oo uu la kulmay ama la shaqeeyey. Waxay Mary Harper ku tilmaantey geeridaa sidan: “*Waxaanay ahayd geeri dareen leh oo taabatay qof kasta oo yaqaanay waayo dad badan baa yaqaanay, gaar ahaan anigu markii aan maqlay geeridiisa waxay noqotay inaan booqdo xabaashiisa una mahadnaqo”.*

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Mary Harper waxay ka warantay tilmaamaha u gaarka ahaa ee uu Axmed Cawke lahaa iyadoo ku sugan hudheelka Maansoor ee magaalada Hargeysa.Waxaanay Mary Harper tidhi: "*Laba shay baan ka odhan cawke, marka koowaad codkiisii waxa uu ahaa mid Dahabi ah, way fiican tahay inaan huteelkan Maansoor ka idhaahdo waayo markii iigu danbaysay anigoo qolkayga fadhiya ayaan dibeda ka maqlay codkiisa, waxaan markiiba idhi codkaasi waa codkii cawke, waan soo dagaagay markii aan albaabka soo gaadhay waxa iga soo hor baxay Cawke waayo codkiiu gaar buu ahaa.*

Ta labaad cawke wuxuu ahaa nin ay dadku isugu mid yihiin, waan ogaa Cawke in uu ka yimi Somaliland, qabrigiisa markaan tagayna wuxuu ku yaalay dhinac Itoobiya, markaan helay wararka xabaashiisana waxaan ogaaday inay dad badani yimaadeen oo masuuliyiin ku jiraan, waxa jirta siyaasiyiinta iyo dadku inay kala qaybsan yihiin, laakiin cawke cid walba saaxiib buu la ahaa".

Warkoo sugan naloo sheeg inuu, saxafigii hoyday

Sadrigaan ka naxay iyo qalbiga saaxi noqon waayey

Iyo samada ciirada ku xidhan, saaka waxa jooga

Safar dheer wadada aan qabsaday, salafka aan daaray

Soohdintii wajaaliyo halkuu, sabi yaraan joogay

Sunsunkiyo gawaadhida cagtaa, socodka dayn weyday

Bahda Mareegaha Farshaxan

www.farshaxan.com iyo www.farshaxan.org

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Meydkoo la soo siday jigjiga, surin la eegaayey

Dad saloogan siigada kacdiyo, salawga yeedhaaya

Gidi suuradoodii wajiga, murugadaa saaran

Indhahaa saxaafiga ilmayn, hililiq sooyaalka

Xaq baa yimid Siciidow wadkaan, ruuxna seegayne

Abwaan Sacad Axmed Xasan-roodhiile

November 23, 2015

"Weli Cawke oo nin la kala hayo lama araga, weli nin ay is diidaan lama hayo, nin aad u dabeecadsan buu ahaa, nin aad u naxariis badana wuu ahaa,waliba sidaasuu dhalinyaro ku ahaa,maantana waxaan qabaa in tiir weyn oo Journalism ahi dumay oo dhacay. Ilaahay isagana naxariistii Janno ha siiyo, innagana samir iyo iimaan Ilaahay ha innaga siiyo. Baahidiisiina cid buuxisa iyo cawlkiisii Ilaahay ha ina siiyo, cawl kheyr qaba…" ayuu yidhi macalinkiisii dhinaca saxaafada ee Mijir Qaadi Maxamuud.

Barnaamijyo loogu baroordiiqayey ayaa meel kasta lagu qabtey. Waxaa jiray mid ay ka soo qayb galeen Aadan Nuux Dhuule, Axmed Cali Askar,Maxamed Aadan Xirsi "Teera", iyo barnaamij wadaha oo ahaa M.Cabdi Xuseen(Shaafi).. Axmed Cali Askar oo madaxdii idaacadii Muuqdisho ka mid ahaa, Axmed Cawkena uu shaqaale ka ahaa ayaa yidhi: "Cawke wuxuu lahaa cod dahab ah oo si wacan kuu taabanaya ,waxay aheyd hibo Illaahey siiyey, tabinta tooskana hibo ayuu u lahaa, wuxuu ahaa geesi dhiiran oo warka mudan in aan wax gef ah lagu sameynin waqti yarna loo haysto diyaarintiisa oo waliba afka Ingiriisiga ku qornaa ayuu ku dhiiran jiray inuu hal-tebin dadka iyo dhagahaba wada qancisa ku sii daayo….wuxuu ahaa nin qalbi xariir ah

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

leh,nin dadkoo dhan u wada dabacsan, Eebbena waxaanu ka baryeynaa tusmadaa wanaagsan ee uu ifka ku lahaa inuu aakhirna Eebbe u qaado oo naxariis iyo Janno ku siiyo”

Doobtiyo rakaadiyo codkii dananka reemaayey

Dib miyaan Ducaaloow dhaguhu daacad u maqlaynin?

Dareen Abwaan, Abwaan Xasan Daahir Weedhsame

Si erayadaa xikmadu ku ladhan tahay ee laga sheegay marxuum Axmed Xasan Cawke loo fahmo, ayey mareegta Farshaxan u hawlgashey inay soo ururiso tusaalayaal lagu ladho tilmaamaha wanaagsan ee laga sheegay wariyahii ummada afka Soomaaliga ku hadasha, madaalihii aan kaftankiisa laga damqan jirin, naftu u bohol yoobi jirtay agjoogiisa ee Axmed Xasan Cawke.

Gu’gii 1967[kii] ayaa dugsiga Sare ee Camuud waxaa soo galay ardey tiro iyo tayaba lahaa, oo ay ka mid ahaayeen Axmed Xasan Sh.Suufi Cilmi (Axmed Cawke),Sheekh Maxamuud Sheekh Axmed Dalmar, Cabdi Idiris Ducaale, Cali Sheekh Axmed Carraale, Cabdiqaadir Maxamed Kastam, Axmed Cali Amaan(Sulub), Muuse Xaaji Maxamuud Guuleed(Muuse Inji), Cabdi Aw Ciise Faahiye, Maax Isaaq, Cabdi Xarbi, iyo koox kalo badan. Sidoo kale ayaa gu’gii 1968[kii] ay soo galeen dugsigaa sare ee Camuud koox kale oo tayo iyo tiraba la wadaagta kooxdaa hore ayna ka mid ahaayeen Dr. Maxamed Sh. Xasan Taani, Yoonis Cali Nuur, iyo Koox kale oo badan. Labadan kooxood way isku lingaxnaayeen, aad bay iskugu xidhnaayeen, isku marna way wada dhameeyeen shaqadii qaranka, isku marna waa la wada shaqaaleysiiyey, Soomalilandna aad bay ugu hanweyn tahay.

Xilliyadan waxaa dugsiga sare ee Camuud ka maamule ahaa Xuseen Tukaale oo aad u kaftan badnaa. Xuseen Tukaale waxay isku gaddo ahaayeen, saaxiibna

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ahaayeen Xasan Sh.Suufi Cilmi (Xasan Cawke). Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Xuseen Tukaale ardeydii uga sheekeeyey siduu ugu tagey deeq waxbarasho dalka Maraykanka. Waxaanu Xuseen yidhi: " Aniga iyo laba ardey oo kale ayaa Nayroobi diyaarad ka raacney,waxay sii qaateen qaadkii miirooga ahaa oo ay cunayeen ilaa intaanu gaadhaynay garoonka diyaarada ee magaalada London….."

Halkaa markuu sheekadii Xuseen Tukaale marinayo ayuu Axmed Xasan Cawke soo booday oo yidhi: " Diyaarad inaan ku dhex qayilo waa ta aanu aduunyadan ka laanahay". Ardeydii oo dhuuxeysay sheekada ayaa qosol jaanta wada rogtay, maamule Xuseenna wuu ku daray qosolkii…

Madal aad u camiran oo qaad ahaan loo goglay ayaa la wada fadhiyey. Waa dabayaaqadii sagaashanadii. Waa magaalada Hargeysa.Dadku waxay ka soo kabanayaan dhibtii dagaalada sokeeye iyo daalki gu'yaashii qaxoootinimada.Dadka madasha wada fadhiyaa aad bay u xiisaynayaan sheekada kala duwan ee marba Axmed Xasan Cawke dhinac u wadhfinayo, isagoo ku ladhaya weedho kaftameedyo.

Axmed Xasan Cawke dadka ma wada garanayo, hase yeeshe aad buu uga madhnaa inuu qaloodo oo weedhiisa ridan kari waayo. Mar danbe oo la kala kacayo ayuu koox inay ka da' yar yihiin muuqato uu ku soo dhawaadey mid ka mid ah oo uu ku yidhi: " adeer ina ayaad tahay".. Wiilkii ayaa la soo booday oo yidhi: "Ina Cumar Toosh Ayaan ahey". Axmed Xasan Cawke ayaa intuu wiilkii madaxa ka dhunkadey, indhahana ku wada eegay kooxdii yidhina: " Adeer ma aniggaa habsaamey, mise idinkaa soo degdegay".. Dadkii madashaa fadhiyey ee bixida u diyaar

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

garoobayey ayaa qosol isla qabsadey madashiina lagu khatimay weedhaasi maankooga ay ku kaydiyeen.

Habeenka Jimcaha ayaa dugsiga sare ee Camuud lagu soo noqon jiray. Ardeydu koox koox ayey isku soo raaci jireen. Qof waliba wuxuu ku dadaali jiray inuu ka mid noqdo kooxda uu Axmed Xasan Cawke ku jiro. U dhago raaricinta sheekada Axmed Xasan Cawke iyo qosolka la isla qabsadey ayaa socdaalkaa lagu sii mari jiray, sahay wax ku oolana u ahaa.Qofka ay fursadaasi dhaafto, todobaadka danbe ayuu u sii qorshaysan jiray, saaxiibadina la wadaagi jiray inaanu maanta soo raacin Axmed Xasan Cawke kooxdii uu ku jiray oo safarka la dareemayey/

Dusiga Sare ee Camuud waxaa maamule ka ahaa horaantii 1969kii mudane Dr.Saleebaan Axmed Guuleed. Sidoo kale ayuu dhigi jiray maadada juqraafiga. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Dr. Saleebaan oo dhigaya casharkii Juqraafigu sawiray khariidada dal ka mid ah dalalka Afrika, ardeydiina ku soo jeestay oo yidhi: " Dalkani ma u eeg yahay mijaha Axmed Cawke"…. Waxaa la ogaa inuu kaftanka qaadi karo, iskana dhicin karo sidaa darteed ayaa qof kastaa si kalsooni ku jirto ula kaftami jiray mudane Axmed Xasan Cawke.

Dugsigaa sare ee Camuud, Axmed xasan Cawke aad buu u soocnaa, tilmaamo badan oo dadka ka dhex soocaya ayuu lahaa. Codkiisa oo aad loogu raaxeysan jiray markuu sheekada ku hodlinayo, tilmaan ka bixinta meel ama qof. Wuxuu aad ugu fiicnaa suugaanta, gudbinta sheekooyinka, sidoo kale ayuu aad ugu fiicnaa luqadaha kale ee xilligaa la baran jirayna sida Ingiriisiga iyo Af-carabiga. Maalin ayaa aabihii Xasan Cawke oo loo geeyey warar is daba socda oo tabinaya in Axmed iyo waxbarashadii kala socod ay ku dhaw yihiin. Xasan ayaa u yimid kuna yidhi: " Aabbo maxaa adiga iyo waxbarashada isku kiin diiday". Axmed

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Xasan Cawke oo afkiisa murti ka madhneyn, jawaabna aan u waayin hadal lagu yidhi ayaa la soo boodey: " Aabo bal soo wareyso oo soo eeg dugsiga anigaa ugu haysta ardeyda luqada Af-ingiriisiga iyo Af-Carabigaba"… Aabihii oo yaaban ayaa yidhi " haddaa maxay nagu akhriyayaaan".. Run baaney aheyd oo aad buu ugu mudnaa luqadahaa, waxaana marna la ilaawi karin sidii quruxda badneyd ee uu u soo gudbin jiray curisyada afafkaa lagu qorayo.

Tilmaamaha kale ee Axmed Xasan ilaa iminka lagu yaqaaney waxaa ka mid ahaa inuu timo weyn oo afro ah la bixi jiray, korna u feedhi jiray. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa maamule Xuseen Tukaale isha ku dhuftay timahan badan ee ku raran Axmed Xasan Cawke oo jidh ahaana dhuubnaa. Markaasuu Xuseen Tukaale yidhi : " Qaar baa intay timo weyn la baxaan,qaadi kari la' ". Af loo waayey af baa ba'ayee, Axmed Xasan Cawke ayaa laga hayaa inuu yidhi: " Ninba meel u weyn".

Ciyaarta Kubbada Kolayga:

Dugsiga sare ee Camuud wuxuu ka koobnaa shan ilaa lix guri. Waxaa tartanka ciyaaraha loo tartami jiray guri guri. Kooxdii guri ku wada jirtaaba koox ayey ahaayeen. Lixdii biloodba marbaa tartankaa la qaban jiray. Waxaa xususs mudan in had iyo jeer tartankaasi markuu socdo aad loo dheehan jjiray ciyaar wanaagga kubadda kolayga ee Axmed Xasan Cawke. Maalin tartankaa la qabanayo ayaa waxaa daawashadeeda ka soo qayb galay maamulihii dugsiga sare ee Camuud ee Dr.Saleebaan Axmed Guuleed. Muddo markuu mudane Saleebaan daawadey ayuu aad uga yaabey ciyaarta la yaabka leh ee uu soo bandhigay Axmed Xasan Cawke, odhaah raagteyna ku yidhi: " Cawkaa qaad cuni mooyee, miyaan meeshaba soo dhigtay sidan buu u

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ciyaari Basketball". Ardeydii dugsigaa ku jirtay waxay ilaa iminka qaarkood aaminsan yihiin inuu Axmed Xasan Cawke ugu mudnaa uguna xariifsanaa kubbada kolayga. Waxaaney aad ummadu iskugu raacsan tahay in Ilaahay hibo u siiyey inuu wuxuu u dhaqaaqaba ka midho dhaliyo, guul la taaban karana ka soo hooyo.

Deeqsi Buu ahaa:

Carrab dalable, uurkoo la dabo, daahir ka nadiifa
Beel daaje, meeshuu degaba, uunku daba joogo
Darmadiisa, daartuu dhigtaba, ruuxan laga daahin
Duq la tebo, dareen aan la hurin,dawlad calankeed leh
Damal dhacay, docdiisii bannaan, deyrna naga ciirye
Dab bakhtiyey, hal-door lagu goblamay, deeqsi ma la aasay.
Nimay dihatay hooyaba wed baan laga dabbaalayne
Rabbigay dunuubtaada dhaaf kaana wada daahir
Inta loo darraadiyo ilaah kaama dhigo deyro
Dareen Abwaan, Abwaan Xasan Daahir Weedhsame

Shilinka soo gala waa la wada lahaa; Gacantiisu way furnayd qof kasta oo faxal buu ahaa;Wali jeebadiisa wax ku jira qof kamuu hakran; Erayadaa iyo kuwo la mid ayaa saxaafada aad ugu soo noqnoqnayey. Waxaa la yaab lahaa dadka isaga yaqaana oo aad u badnaa, ayaa waxaa dhici jirtay inaanu isagu wada aqoonin. Shirkii Sopra ayaa lagu qabanayey magaalada Washington, DC. Waxaa Axmed Xasan Cawke uu la kulmay dad badan oo ay aqoon dheeraad ah isku lahaayeen. Axmed Xasan Cawke ayaa u kacey dhinac uu fadhiyey Dr. Maxamed Sh.Xasan Taani, una sheegay inuu casho ahaan marti maanta ugu yahay. Markay baxayeen ayaa waxaa soo raacey wiil kale , markii Axmed Xasan la waydiiyey kuu yahay wiilkani ayuu ku jawaabey: "

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ma garanayo, xataa magaciisoo qudha ma aqaan garasho kale iska dhaafoo". Hase yeeshee Axmed Xasan muu reebin , ee way wada casho tageen.

Marxuum Axmed Xasan Cawke wuxuu ku baadi-soocnaa inuu wuxuu gacanta ku hayo lala wada leeyahay.Dhaqaale la urursado aad buu uga soo horjeeday. Sagaashanaadkii ayaa isagoo Axmed Cawke Hargeysa jooga lagu yidhi " Hantidii aabahaa ka dhintay walaashaa baa gacanata ku haysa ee miyaanad qaybtaada doonanayn".. Isagoon is dhibin ayuu Axmed Cawke ku jawaabey:" Aabahay iyo hooyadey inantaa kaliya ayey ila dhaleen,inaan wax ugu daro mooyee intaa iyadaa iska leh".

Markuu dhigan jiray dugsiga Camuud ayaa aabihii Xasan Cawke wuxuu ahaa hantiilaha ugu magac dheer degaanada galbeedka Soomaaliland, haddana maalin kaliya lagama dareemi jirin inuu Axmed Xasan Cawke ka soo jeedo qoyskaasi hantida Ilaahay ugu deeqay. Wuxuu gacanta ku hayo waa la wada wadaagi jiray. Reerkuu ka soo jeedo ayaana tilmaantaa wada lahaa.Bal dib u raac Xasan Cawke oo deeqsinimadiisa laga waramayo, adeerkii Maxamed Xabiib oo Lawyacade dad baahani hudheelka iska seexanayaan, waxna ka cunayaan lacag la'aan, adeerkii Jaamac Feesto oo martida u roonaa, guriga awoowgii Sheekh Suufi Cilmi oo xertu intay doonaan joogi jireen, kana warwari jirin waxay cunaan iyo cabaanba, walaashii Canab oon agteeda lagu gaajoonayn.

Magaalada Tog-Wajaale oo ah Magaalo qadiimi ah oo camiran ayaa waxaa bundhigeeda lahaa mudane Xasan Cawke. Mujaahid Maxamed Xasan Cabdilaahi(jidhif) oo ka waramaya ayaa yidhi: " Xasan Suufi Cilmi(Xasan-Cowke), oo dadka Deegaanada fog ka yimaada gaar ahaana

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Miyiga hadii wax lagaga iibsan waayo Magaalada sida Xoolaha, Subaga, Caanaha,Xaabada, Hadhuudhka,Galeyda, isagu qiimihii ay ku doonayeen dadkaasi ka siisan jirey oo lagu rogi jirey bakhaarkiisa"..

Gu'gii 1970kii ayaa ardeyda dugsiga sare ee Camuud loo qaadey inay gooyaan dalagii ka soo baxey Tog-Wajaale. Markii hawshii dhamaatey ee ardeydii la celinayey ayuu Axmed Xasan Cawke ardeydii fasalkiisa ku yidhi "iska jooga dhamaantiin anigaad marti ii tihiin, gaadhina waynu heliyee". Axmed wuxuu u tagey aabihii oo fadhiya bakhaarkii , una sheegay in uu ardeydii fasalkiisa dhamaan ku casuumay gurigooda. Aabihii Xasan Cawke dhinacaa iyo dhinacaa muu eegin ee afar neef ayuu qalay, qaadkiina ugu darey sooryada, soona kireeyey gaadhi ardeydaa geeya Camuud.

Rabbigay dunuubtaada dhaaf kaana wada daahir
Inta loo darraadiyo ilaah kaama dhigo deyro
Dabka naarta,degelkii ibleys, diirka olol leefa
Jahannamada lagu daadiyee daallin lagu oodo
Dambaabiro saciiraad rabbigu kuuma dalandoolsho
Duddo nabada iilkaagu noqoy daarad naxariisa
Qabrigaagu daartii jannada daa'im idamkiisa
Rabbigay dallaalimo qabow kaaga dede guudka
Ku durduuri webigii jannada doobi kugu siiye
Rabbigaygu daalkii ifkiyo kaa tir dacaskiiba.
Inta loo dardaray kawsar ee diifta laga baantay
Lana deristay nebigii mudnaa daahe dhinac taalla
Rabbi kaa dhig duunkaan ka idhi ducada aamiine.

Bahda Mareegaha Farshaxan
www.farshaxan.com iyo www.farshaxan.org

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Dareen Abwaan, Abwaan Xasan Daahir Weedhsame

La soco qaybaha danbe ……..

Soo diyaarintii

Fu,aad Sheekh

Bahda Mareegta Farsahxan

Qaybtii 4aad
Bahda Mareegta Farshaxan
Diisamber, 2015

Siduu Xamar uga baxey:

"Coomaadi duulayeey Cadan ka keeneen

Cirka iyo dhulkii bays qabsaday cadhadhaqdoodiiye

Caamir waa saleellee, anaa haatan caymadiye

Adiguba caqlaad leedahaye carar maxaa dhaama"?!

(Sayid Maxamed Cabdille Xasan)

" Markuu Maxamed Siyaad maalin kasta dhawr telefoon jabiyey, jeneraaladii ciidamaduna cagaha wax ka dayeen,ayaan is idhi reerka meesha ka saar, talo cakirantayee" ayuu yidhi Axmed Xasan Cawke(IHUN).

Waxaa aad la iskugu raacsan yahay in uu Axmed Xasan Cawke ahaa nin kaftan badan, dad la socod leh, qofna aan u geysan gef. Dhawr jeer oo la waydiiyey inuu ka waramo ama

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

aflagaadeeyo Ina Siyaad Barre oo uu afhayeen u ahaa muddo, wuxuu ku jawaabey: “ Ninkaan afkayga ku amaaney, afkayga ku aflagaadeyn maayo”.

Taasi waxay muujinaysa edebta saxaafada iyo hab-dhaqanka suuban ee laga rabo qofka suxufiga ah. Suxufigu maaha siyaasi u heelan fulinta danaha iyo ujeedada dadka uu ka soo jeedo. Waana sida dhakhtarka aan ku aflagaadeyn cudurka dadka uu daweeyo, walina aan la arag Dr.Maxamed Cabdi Gaboose oo aflagaadeynaya Ina Siyaad Barre caafimaad ahaan. Dareen Suxufigu uu kula damqado dadka uu ka soo jeedo wuu yeelan karaa, kana falcelin karaa isagoo cadeysanaya sidii Mustafe Xaaji Nuur (IHUN). Wuxuu Mustafe noqday gudoomiyihii Jabhadii u horeysay ee cadeysatey inay Ina Siyaad Bare maamul xumadiisa qori caadadii kaga hor tagayaan.

Horaantii 1990kii ayaa ciidamadii jabhadihii SNM, USC iyo SNM soo hooyeen guullo la taaban karo. Magaaladii Xamar ayaa inta badan gacanta u soo galeysay ururkii USC ee uu hogaanka u hayey Maxamed Faarax Caydiid(IHUN). Sidoo kale ayaa koox ka kooban ganacsato, siyaasiyiin iyo waayeel ay isku tageen, aasaaseena ururkii Manifesto bishii May 15dii, ee 1990kii.

Sidoo kale bishii Oktoober 2dii,1990kii ayaa magaalada Mustaxiil kulan ku dhex maray jabhadihii SNM, USC iyo SPM ayna kala hogaaminayeen mudane Cabdiraxmaan Axmed Cali, Maxamed Faarax Caydiid, iyo Axmed Cumar Jees siday u kala horeeyaan. Shirkan waxaa lagu go’aansadey sida la yeelayo marka gacan buuxda lagu wada dhigo dalka ee koox waliba dhinaceeda hanato.

Dagaalkii ayaa saddexdaa jabhadood guulo ka soo hooyeen.Bishii Diisamber 12dii, 1990kii ayaana kooxdii USC ay u suurtogashey inay magaalada Xamar gudaheeda ku

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

tamashleeyaan. Dawladii uu hogaanka u hayey Afweyne Siyaad Barre waxay ku soo urureen xarumaha Idaacada iyo Madaxtooyada. Bishii Janaayo 7dii, 1991kii ayaa Afweyne Siyaad Barre abaabulay koox ka koobneyd 75 nin oo uu ugu magacdarey Sulux, waxaanu ra'iisal wasaare ka dhigay Cumar Carte Qaalib. Ina Siyaad Barre wuxuu filayey in dagaalku sidaa ku dami doono, oo dawladan cusub dadku iska wada dhex arki karo.Horaa loo yidhi Caduur dhawdhawdu uma dhacsana, sidoo kalena lagu ladhaa wanka indhihiisu cirka ma arkaan ilaa qoorta la gooyo. Kooxdaasi waxay la kulmeen Maxamed Faarax Caydiid oo u sheegay inaanu heshiis galeyn inta Ina Siyaad Barre madaxweyne u magacaaban yahay, ee horta isagu meesha ha ka tago. Heshiiskaasi la rabey inuu dhaco muu dhicin, sidii loo kala fogaa baana loo sii kala fogaadey.

Ina Siyaad Barre ayaa waxaa hareerihiisa ku sugnaa koox yar oo ay ka mid ahaayeen jeneraal Cabdiraxmaan Guulwade oo uu sodog u ahaa Ina Siyaad Bare, Jeneraal Dhiigyacab Moorgan oo uu sodog u ahaa Ina Siyaad Bare, Wasiir Cabdisalaan Sh.Xuseen oo Ina Siyaad ku ag barbaarey, ilaa 1969kiina xil dawladeed hayey iyo dhawr qof oo kale oo uu Axmed Xasan Cawke ka mid ahaa. Odaygii markaasuu kolba telefoon qaadey oo codsadey in loogu yeedho jeneraal hebel. Jawaabtii waxay dhaafi wayday " Dhuuso mareeb buu sii socdaa, Afgooyuu ka sii gudbayaa, Nayroobi ayuu galay, jabhaddii Caydiid buu isku dhiibay, iwm" .

Cadho darteed ayuu Ina Siyaad Bare teleoonka dhulka ku dhuftaa. Markii dhawr telefoon la badaley ayuu Axmed Xasan Cawke arintii dib u eegay, xasuustayna erayadii " adiguba caqlibaad leedahee carar maxaa dhaama". Axmed xasan cawke intuu kaxeystay gaadhigiisii ayuu reerkiisii ku raray, geeyeyna magaalada Kismaayo. Dadkii arkey ayaa yidhi : "Waar odaygii maxaad uga timid" .. Axmed Xasan Cawke oo lagu yaqaan inuu runta si

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

kaftameysan u sheego ayaa laga hayaa: “Markuu odaygii dhawr telefoon maalin kasta jabiyey, ayaan is idhi kuwii jeneraalada ahaa ee wax u tari lahaaba meesha ka cararee, maxaad u qaban”. Sidaasoo kale ayuu Axmed Xasan Cawke ku jawaabey 1994[kii] mar la waydiiyey isla waydiintaa isagoo ku sugan hudheelka Embassy ee Kiiniya ku dhex yaala. Xilligan waxa la qabanayey shirkii wadamada ka mid ah “African Development Bank” oo markaa lagu qabtey Nayroobi. Waxaana shirkaasi ka soo qayb galay madaxweyne Nelson Mandheela. Bishii Janaayo 26[kii], 1991[kii] ayuu Afweyne Barre firxad iyo naf la orod uga baxey magaalada Muuqdisho.

Axmed Xasan Cawke oo mar isagoo Nayroobi jooga laga wareysaneyey socdaal uu ku soo gaadaa bixiyey dalalka Djibouti, Somaliland iyo Kenya oo uu markaa ku sugnaa ayuu u raaciyey, socdaalkiisii uu kaga soo baxey Muuqdisho, kuna soo gaadhey Nayroobi bishii Janaayo 1990. Si xikmadaysan, murti badanina ku jirto ayuu socdaalkaa kaftan qurux badana ugu ladhay , waxaanu yidhi:

“Waxaan ka soo baxey magaalada Muuqdisho xaafada Kaasabalbalaare, aan uga soo baxey Kalooni aan marey kali-Aseyle , Kutuwaarey aanan ku leexan ilaa iyo aan ka soo gaadhey Kuunyo Barow, Kalsuuma oo aan soo dhaafey,kuna hoyday magaalada Kismaayo, dhinaca badda aan soo marey aaney ka mid ahaayeen Gasiiradii aan soo marey Karaayuu ilaa aan ka soo gaadhayey Kuuga, Kiyanuga(Kipungani) aan soo gaadhay oo aan ka galay Kiyungu uu lanagu baadhey. Dalku waa Kiiniya, dadku waa ……. dadka ugu badani waa Kukuuya, Xisbiga dalka xukumaa waa Kaanuu, madaxweynihii ugu horeeyey waa Kiiniyaate, erayada aan ka bartey waa Kuuja waa kaaley, Koondha(kuenda) waa tag, Kaah waa fadhiiso, Kayti(Kiti) waa kursiga, Koobme waa koobka, Kijiko waa qaadada, Kidongo (Kidogo) waa wax yar . Qiyaasta Qaadku

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

waa Kiilloo, Kiyoos ayaa lagu gadaa, kursi ayey ku fadhiistaan, Kookoolaha way dalooshadaan, Koodh weyn ayey xidhan yihiin, kalmadooda u danbeysaana waa Kamili”.

Ina Siyaad Barre(Afweyne) ayaa muddo yar ka dib soo abaabuley ciidan, goostayna inuu ku soo laabto Muuqdisho. Markay ciidankii marayaan magaalada Diinsoor ayaa sheekhii magaaladaasi oo ahaa Sh.Maxamed Sh.Xuseen kulan la yeeshay, kuna yidhi ina Siyaad: “ Ilaahay muddo dhan 20 gu’ ayuu xilka ummada kuu dhiibay,iminka waxaa dagaalamaya ciidamo ku salaysan qabiil ee maad iska noqotid,ood diidid inaad noqoto kaaba qabiil?

Ina Siyaad oon laheyn shaashkii libaax ee looga bartey,dabacsanaana u muujinaya cid kasta oo uu taageero ka heli karo ayaa yidhi: “Waa runtaa sheekh ee uma socdo inaan mar danbe madaxweyne noqdo, waxaan doonayaa inaan mar uun xilka gacanta ku dhigo si aan u karbaasho qabiilo oo dhibtay geysteen aniga la iga jarayo maanta”.

Qoraalka taariikheed yaa ina taraarayee aan dib ugu soo noqono ka warankii Marxuum Axmed Xasan Cawke.

Axmed Xasan Cawke ayaa shaqo ka helay 1996 idaacada ku soo caano mashey magaca BBC, ee iminka u digo rogatey magaca Baafinta Beenta iyo Colaada, uuna hogaankeeda ahaa isla boodsane Yuusuf Garaad. Gu’gii 2007 ayuu ka digorogtay, orad dheerna ku tagey dalka Maraykanka oo uu ka mid noqday shaqaalaha VOA. Waxaa markaa Axmed la waydiiyey wuxuu idaacadaa magaca lahaan jirtay wuxuu uga yimid, waxaanu yidhi: “ Ninbaa

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

laga sheegayey inuu yihdi nin weyn baan ahayoo warami maayee , waxaan arkay waaba la ogaan.Runtii waxyaalaha igu kalifay waa idaacad weyn , guud ahaan waa idaacadaha taariikhda ku leh afkay doonaan ha ku baxeenee caalamkan ee laga danbeeyo ee la qadariyo . Laakiinse waxaa weeyaan haddii wuxuu si u yara majarehabaabaan ma sii fiicna. Ha weynaato oo iminka markaynu ka soo qaadno luqada Af-soomaaliga oo akle konton gu' ayaa u buuxsamey, waana idaacad weyn oo dadku aad ugu xidhanaa ayey aheyd, laakiinse lama matalo labadaba , dalki la odhan jiray Soofiyeey Union-kuba(MIdawgii Soofiyeet) marbuu Power(Awood) lahaa, Soomaaliyaba mar bay aheyd dal la qadariyo haddana waad aragtaa oo siday tahay cidna looga sheekayn maayo.Markaa weynida hore uun lama raacee wixii markaasi jira ayaa meesha taala. Nolosha intaad nooshahay waa inaad horumar samaysaa, wax hiigsataa, markaa haddii wixii aad hiigsan laheyd halkan ku gaadheyn kolay meel kalaa jirta, oo waad badalaneysaa"…. Markaad weedhahaa quruxda badan dhuuxdo waxaad dareemaysaa siduu afkiisa u dhawrayey, waxaadse garan kartaa inuu naf- la carar ahaa oo quus ka joogay hogaanka iyo hab-dhaqanka idaacadaa. Waxaanu miciinsadfey inuu digo-rogto "adiguba caqlibaad leedahee carar maxaa dhaama".

Weedho xikmadaysan:

Dadku suuraddoo qudha *Ama saan il qabasho leh*
Kuma kala sarreeyee *Xaqiiq aan surkeediyo*
Garashadu salkeed helin *Sanku aanu urinayn*
Ishu aanay suganayn *Dhegtu aanay sawdkiyo*
Sanqadheeda qabanayn *Sacab aanu taabayn*
Muuqaalku saabkiyo *Sabadeeda uun yahay*
Kala-sooci waa taa; *Waxan uga socdaa hee*
Nafta ruuxa sudhan baa *Sansaantiisa qeexdoo*

Bahda Mareegaha Farshaxan
www.farshaxan.com iyo www.farshaxan.org
Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fal kastuu sameeyaba Halka laga sar gooyaa

Saldhiggeeda weeyoo

Maansada Suur, Abwaan Xasan Daahir Weedhsame

Murxuum Axmed Xasan Cawke wuxuu aad ugu horeeyey adeegsiga erayada xaraf-raaca leh iyo weedhaha xikmadeysan. Guriga uu ka so jeeday baana arintaa lagu tilmaansan karaa. Aabihii Xasan Sh.Suufi(Xasan Cawke) ayaa laga codsadey in nin reer Jigjiga ah oo dibbi keenay Wajaale uu habeenimo xoolaha xeradiisa ugu hooyo. Ninkii reer Jigjiga ayaa arooryadii hore kacey oo labadii (xoolihiisii iyo xoolihii Xasan Cawke ee xerada ku jiray) dareersadey. Waagii markuu baryey ayuu Xasan Cawke arkey xeradii oo madhan.

Muddo ka dib ayaa wuxuu u baahdey shaqaale beerta uga shaqeeya, waxaa loo keenay nin tilmaamo fiican laga bixiyey oo la yidhi: " waa nin aqoon fiican u leh beeraha, waa nin wanaagsan oo degaan ahaan ka soo jeeda magaalada Jigjiga".

Xasan Cawke oo dib u jaleecay xoolihii xerada laga dareersadey ayaa la soo booday: " Waa nin wanaagsan iyo waa reer Jigjigga kala daa".

Dabayaaqadii 1990kii ayaa Cawke oo ka hawlgalayey idaacada magac ahaan uun iminka sii taagan ee BBC-da ayaa socdaal shaqo ku tagey magaalada Hargeysa. Markii uu noqday ayaa la waydiiyey wuxuu Hargeysa ku soo arkay. Waxaanu Axmed Cawke ku jawaabey " Dad isku wada cilmi ah, dad isku wada cimri aha, dad wada caaqilo ah". Wuxuu Axmed Cawke sii wadey sii balbalaadhintii eryadaa murtiyeysan, waxaanu yidhi: " Macalin iyo ardeygiisii ayaa ardeygiina leeyahay waad iga weyn tahay oo macalin baad ii aheyd, macalinkiina ku doodayaa adigoo weyn baa dugsiga lagu qoray ee adigaa iga weyn, dhakhtar qalniinka iyo mid aaney aqoonta sayniskuba u bilaabmeyn ayaa dhkhtarkii oo ka sheekaynaya qalniinada uu soo qalay, uu

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ka hoos leeyahay midida uun baad dadka dhex marisaanee ma qalniin iyo daaweyn baa sidaasi, caaqil iyo kuu caaqilka u ahaa ayaa iyagoo wada qayilaya isku haysta sidii reerka danahooga loo maareyn lahaa”…..

Socdaal dheer oo geeska Afrika ku gaadaa bixiyey isagoo shaqaale BBc-da ka mid ah ayaa la waydiiyey waxyaalaha isbadalay, waxaanu yidhi: “Warwar iyo walbahaar, ka leeexo waa askarigiiyee, Saddex shanaad oo loo shaxaad tago : shan doolar uu moobiilka ku shubto, shantii doolar baasiinka iyo shantii doolar ee uu qaadka siidan lahaa…..

Waxyaalaha kale ee u ka yaabey afeefna uga dhigatey barnaamijkiisii Socdaalka aduunka, wuxuu ahaa:

“Wararka aduunka iyo waayahay jooga waxaa n marna laga waayin oo mar kasta soo noqnonaya dagaalo, dad leeday, iyo dhiig daatey; dhulgariir lagu hoobtay, duufaano dabaylo wata,; Wabiyo karkaarada jabshay oo deegaano dhan biyihii dul mareen; roobab mahiigaan ah oo mood iyo noolba cagta mariyey; Diyaarado wax duqeeya oo dad laayey; Qof isku qarxiyey meel lagu badan yahay;Qaraxyo lala beegsadey ciidamo dawladi leedahay;Miino la kacdey kolanyo baabuur ah;Baabuur miinaysan oo lala beegsadey xarun dawladeed;Ummad qaxdey,qaxooti xaaladooda nololeed laga dayriyey; Banaanbax laysku faro saarey oo ka dhacey halkaasi; Folkaano ka dhacey dayaxa oo cirkii qariyey; Dhaqaalihii oo burburay, sayladaha wax lagu kala iibsado oo baaxaa degaya, qiimihii lacagta oo hoos u dhacey;Sicirkii maciishada oo cirka isku shareeray; Dab xoogleh oo degaano digaaandigaha ka dhigay meel heblaayo; Gantaal ku habsadey goob aan loola jeedin oo ku dilay dad rayid ah;Baraf xoog leh oo baajiyey duulimaadyadii diyaaradaha ee qaarada Yurub iyo Maraykanka; Abaaro iyo ooddo lul; Afganbi

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ka dhacey halkaa; Qaylo-dhaan ka soo yeedhay halkaasi oo dhego-jalaqsani ka heshay isla meeshaas; Beelo ku dagaalamay dhul-daaqsimeed; Kufisga,kadeedka, iyo kacaakufka dadka Soomaalida eek u jira xeryaha qaxootiga ee dalka Kiiniya; Tahriibayaasha Soomaalida eek u tacadareysan dalalka Carbeed, iyadoo tarxiilna u raaco;Qaxootiga Soomaaliyeed eek u tabaaleysan dalka Talaaniga,Liibiya ka sii daran, ma Giriig baase u dhaama, Yamanta waabey ku madheen; Dictaatoorada Carbeed ee duubka weyn oo daad u soo galay; Kabash kabash iyo qaar kaloo badan;

Rabbigay dunuubtaada dhaaf kaana wada daahir
Inta loo darraadiyo ilaah kaama dhigo deyro
Dabka naarta,degelkii ibleys, diirka olol leefa
Jahannamada lagu daadiyee daallin lagu oodo
Dambaabiro saciiraad rabbigu kuuma dalandoolsho
Duddo nabada iilkaagu noqoy daarad naxariisa
Qabrigaagu daartii jannada daa'im idamkiisa
Rabbigay dallaalimo qabow kaaga dede guudka
Ku durduuri webigii jannada doobi kugu siiye
Rabbigaygu daalkii ifkiyo kaa tir dacaskiiba.
Inta loo dardaray kawsar ee diifta laga baantay
Lana deristay nebigii mudnaa daahe dhinac taalla
Rabbi kaa dhig duunkaan ka idhi ducada aamiine.

Dareen Abwaan, Abwaan Xasan Daahir Weedhsame

La soco qaybaha danbe ……..

Soo diyaarintii

Fu,aad Sheekh

Bahda Mareegta Farsahxan

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Xigasho:

-Qoraal -Taariikhda Magaalada Wajaale --- Nimcaan Dheeg

-Qolka Kaydka Mareegta Farshaxan

-Qoraal: –Taariikh ku saabsan magaalooyinka Saylac, Berbera,iyo Sheekh
by Sayid Maxamed Yusuf "Dhegey"

-Wareysiyo:

-Dr. Maxamed Sh. Xasan Taani

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

-Maax Isaaq

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

-Maxamed Maxamuud Liibaan

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

-Sheekh Sacad Muuse

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

-Axmed Yuusuf Ducaale

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

-Axmed Cali Amaan (Sulub)

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

Axmed Gabiley

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Wareyste: Bahda Mareegta Farshaxan

Copyright ©2003-2015 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.